



Degmo Dugsiyeedka Wilson Xeerka Maxaliga ah ee Faya dhawrka

Degmada Dugsugu waxay ku dedaalaysaa inay door wayn ku yeelato faya dhawrka guud, caafimaadka dhimirka iyo tayada jirka, iyo awooda waxbarashada ee arday kasta ayadoo siinaysa fursada ay si buuxda uga qaybgeli karaan hanaanka waxbarashada.

Degmada ayaa diyaar u ah inay bixiso goobaha waxbarashada si kor loogu qaado loona difaaco caafimaadka, faya dhawrka, iyo awooda si ay wax u bartaan ayadoo la taageeraayo cunista cuntada caafimaadka leh iyo jimicsiga. Cunto cunista caafimaadka qabta ayaa la cadeeyay inay yarayso khatarta dhimashada iyo qaadista xanuuno badan oo dabo dheeraada marka dadku sii waynaadaan.

I. QEEXITAANNADA

Cunto Caafimaad leh: Dhammaan cuntooyinka iyo cabitaannada la bixiyo ama laga iibsho ardayda gudaha xarunta dugsiga muddada maalin dugsiyeedka oo ka baxsan cuntooyinka lacagtooda lasoo magdhabo ee lagu baxsho barnaamijka cuntada carruurta ee qaran sida Barnaamijka Qaran ee Qadada ama Barnaamijka Quraacda Dugsiga.

Xarunta Dugsiga: Dhulka ay leedahay ama kiraysatay Degmadu loona adeegsado waqtigaas hawlaha la xiriira dugsiga, ayna ku jiraan aagaga ka baxsan dhismaha dugsiga, basaska dugsiga ama gaariyaasha kale ee loo adeegsado qaadista ardayda, goobaha ciyaaraha iyo garoonnada (tusaale, boorka dhibcaha, qaboojiyaasha, koobabka iyo dhalooyinka biyaha) ama aaga baakinka.

Maalinta Dugsiga: Waqtiga u dhexeeya saqda dhexe habeenkii ilaa sodon (30) daqiiqo kadib dhammaan maalinta casharada dugsiga.

Arizona Health Zone (AZHZ) oo ku taala dhulka ku dhagan University of Arizona Maricopa County Cooperative: AZ Health zone waxay taageertaa bulshooyinka si ay isbadello caafimaad leh ugu sameeyaan guryaha iyo xaafadaha. Shaqaalaha AZHZ ayaa ka shaqeeya aagaga kaladuwan oo yoolka la saaro ayna ku jiraan waxbarashada nafaqada, shaqada jirka, beerista, caafimaadka dugsiga iyo helitaanka cuntada.

II. MAAMULKA

Guddiga Faya Dhawrka:

Ujeedada Guddiga Faya Dhawrka waa inay abuuraan yoolalka ayna dusha kala socdaan xeerarka iyo barnaamijyada caafimaadka iyo badqabka, ayna ku jiraan abuurista, dhaqan gelinta iyo dib u eegista mararka qaar iyo wax ka badelka Xeerka Faya Dhawrka Degmada.

Kormeeraha guud ayaa magacaabaaya Guddiga Faya Dhawrka oo ka kooban ugu yaraan hal (1)

kamid ah kuwa soo socda: wakiil ka socda heer dugsi, waalidka/masuulka, ardayda, Agaasimaha Degmada ee Cuntada Carruurta, macalinka waxbarashada jirka, xirfadaha caafimaadka ee dugsiga, maamulaha dugsiga, iyo shaqsiyaad kasta oo kale oo dadwaynaha kamid ah.

Gudiga Faya Dhawrka ayaa kulmi doona ugu yaraan afar (4) jeer sanadkii si loo qiimeeyo xeerka iyo dhaqan gelinta.

Kormeeraha guud ee dugsiga waa inuu uga waramaa Gudiga ku dhaqanka Degmada ee Xeerka Faya Dhawrka sida sharcigu amraayo.

Ugu yaraan, Xeerka Faya Dhawrka ayaa la cusbooneysiin doonaa ugu yaraan saddexdii sanaba mar kadib marka xeerarka la dejiyo.

Dhaqan gelinta:

Waxay xog hadda ka bixinaysaa yoolalka iyo ujeedooyinka heerarka nafaqada ee dhammaan cuntooyinka iyo cabitaannada laga heli karo xarunta dugsiga, suuqgaynta cuntada iyo cabitaanka, hormarinta iyo waxbarashada nafaqada, jimicsiga jirka, waxbarashada jirka, iyo hawlaha kale ee lagu bixiyo dugsiga ee kor u qaadaaya faya dhawrka ardayda.

Diiwaan Haynta:

Natiijooyinka qiimayn kasta ayna ku jiraan heerarka dugsiyadu ay waafaqsan yihiin xeerka Degmada, heerka xeerka Degmadu waafaqsan yahay sharciyada federaalka, iyo qeexitaanka/khulaasada hormarka laga gaaray yoolalka Degmada, ayaa loosoo bandhigayaa dadwaynaha. Macalimiinta waxbarashada jirka iyo xirfadleyaasha caafimaadka ee dugsiga waa inay fursad u helaan si ay uga qaybgalaan qiimaynta iyo dhaqan gelinta xeerkan.

Ogeysiiska Sanadlaha ah:

Warbixin sanadle ah waa in loo gudbiyaa Gudiga si looga warbixiyo ku dhaqanka Degmada ee sharciga iyo xeerarka la xiriira faya qabka ardayda. Warbixinta waxaa ku jiri kara laakiin kuma koobna:

- A. Qiimaynta barnaamijka adeegyada cuntada.
- B. Talooyinka la xiriira wax ka badelka xeerka iyo/ama barnaamijka.
- C. Qiimaynta dhammaan cuntooyinka iyo caabitaannada lagu iibiyo dugsi si loo hubiyo inay waafaqsan yihiin shuruudaha nafaqada ee loo dejiyay.
- D. Qiimeynta goobta dugsiga si looga eego arimaha la xiriira faya qabka ardayda.
- E. Qorista shaqooyinka iyo barnaamijyada la sameeyay si kor loogu qaado nafaqada iyo jimicsiga jirka.
- F. Bixinta fikradaha ay dhiibteen shaqaalaha Degmada, ardayda, waalidiin ama masuuliyiinta, iyo xubnaha bulshada.

Si waafaqsan Sharciga Qadada Dugsiga ee Qaran (42 U. S. C. 1751 et seq.) iyo Sharciga Nafaqada Carruurta (42 U.S.C. 1771 et seq.), sida lagu cadeeyay, xaqiijinta ah in shuruudaha degmada ee cuntooyinka lacagtoda loo celin karo aysan ka xadidaad yarayn xeerarka iyo shuruudaha la siiyo dugsiyada sida ku cad sharciga federaalka ayaa la bixin doonaa sanad kasta. Kormeeraha guud waa

inuu damaanad qaad ka helaan dhammaan maamuleyaasha ay qusayso iyo kormeereyaasha kahor inta aanu warbixinta sanadlaha ah u gudbin Gudiga.

Sanad kasta, Degmada ayaa u sheegi doonta qoysaska iyo dadwaynaha xogta aasaasiga ah ee ku saabsan Xeerka Faya Dhawrka, ayna ku jiraan mawduucyadiisa, waxyaabaha laga badelay xeerka iyo heerkiisa dhaqan galka.

Qiimaynta:

Yoolka aasaasiga ah ayaa noqon doona in si joogto ah (ugu yaraan sanad kasta) in la qiimeeyo waxtarka xeerka ee kor u qaadista cunto caafimaad leh iyo badelida barnaamijka sida ku habboon si loo kordhiyo waxtarkiisa. Qiimaynta noocaas ah ayaa noqon doona mid la cabiri karo.

Ayadoo kaashanaysa AZ Health Zone, Degmada ayaa samayn doonta qiimaynta xeerka faya dhawrka kaasoo ay ku jiraan iskudarka Xeerka Wilson oo loo eegaayo heerka xaaladiga ah.

Ka qaybgalka Bulshada, Iskuxirka, iyo Wada Hadalka:

Yool aasaasi ah ayaa noqonaaya in lala shaqeeyo xubnaha qoyska, ardayda, iyo wakiillada maamulka cuntada ee dugsiga, Gudiga Maamulka, maamuleyaasha dugsiga, iyo dadwaynaha si ay uga qaybgalaan hormarinta iyo dib u eegista joogtada ah ee xeerkaan dugsiga.

Degmada ayaa ku dedaalaysa inay noqoto mid aruurisa fikradaha bulshada. Degmada ayaa si firfircoon uga warbixin doonta waxyaabaha soo socda:

1. Degmada ayaa u sheegi doonta waalidiinta hormarinnada lagu sameeyay cuntada dugsiga iyo ku dhaqankeeda heerarka cuntada ee dugsiga; lifaaqa hoose ka eeg faaffaahin dheeraad ah: <https://www.wsd.k12.az.us/Food>
2. Degmada ayaa u sheegi doonta waalidiinta helitaanka barnaamijyada nafaqada ilmaha ee Degmada iyo sida loo codsan karo;
3. Degmada ayaa la wadaagi doonta xog ku saabsan qeexitaanka iyo ku dhaqanka heerarka Cuntooyinka fudud ee Casriga ah ee Nafaqada Dugsiga.

Xiriirada degmada ayaa lagu samayn karaa qaabab kala duwan ayna ku jiraan iimeelka, webseedka degmada, waraaqda wararka, bandhigyada loo sameeyo waalidiinta iyo qaababka kale ee Degmada iyo dugsiyada Degmadu xogta ku siiyaan waalidiinta.

III. NAFAQADA

Cuntooyinka Dugsiga:

Dhammaan cuntooyinka iyo cabitaannada laga heli karo xarunta dugsiga oo adeegga iskudarka laga bilaabo dugsiga barbaarinta (PK) ilaa fasalka sideedaad (8aad) inta lagu jiro maalinta caadiga ah ee cuntada ayaa la waafajin doontaa Heerarka Nafaqada ee Arizona. Shuruudaha cuntooyinka dugsiga ee lacagtooda la bixinaayo waa inaysan ka xadidnaan badnayn xeerarka iyo shuruudaha uu soo saaro Xoghayaha Beeraha sida ku cad sharciga. Degmada ayaa abuurin doonta habraacyo xal u helaaya dhammaan cuntooyinka (ayna ku jiraan Cuntooyinka Leh Heerarka Nafaqada ee ugu Hooseeya iyo libabka Cuntooyinka Tayada Sare) oo ay heli karaan ardaydu dhammaan maalinta dugsiga lagana heli karo meelaha soo socda:

- A. Barnaamijka Cuntada Dugsiga ee Qaran iyo Cuntooyinka Barnaamijka Quraacda dugsiga.
- B. Adeegyada la carte waa barnaamij bixiya adeegga cuntada.
- C. Mashiinnada cuntada laga dalbado (hadday jiraan) iyo dukaannada dugsiga.
- D. Xafladaha fasalka, dabaaldegyada, lacag aruurinada, abaal marinnada, iyo munaasabadaha dugsiga.
- E. Cuntooyinka fudud ee lagu baxsho barnaamijyada dugsiga kadib.

Si loo ilaaliyo hiigsiyada barnaamijka nafaqada ee Degmada, keliya cuntada uu diyaariyay ama uu keenay barnaamijka adeegyada cuntada ee Degmada ayaa la bixin karaa. Tan waxaa ku jira abaalmarinta fasalka ama barnaamijyada abaal marinta ee la xiriira agabka cuntada iyo sidoo kale cuntooyinka iyo cabitaannada lagu bixiyo ama lagu iibsho munaasabadaha la maalgasho muddada maalinta dugsiga. Ogolaansho ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo in cuntooyinka la baxsho ay buuxshaan shuruudaha xeerka nafaqada ee Degmada iyo sharciga (tusaale, dhammaan cuntooyinka la baxsho oo waafaqsan cuntada caafimaadka leh qaybna ka qaata kobcinta caafimaadka nolosha oo dhan ee dabeecadaha cunista cuntada caafimaadka leh ee ardayda Degmada).

A.R.S. 36-136 ayaa bixinaa shardi dhaaf ku aadan xeerarka uu bixiyay Agaasimaha Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee cuntada wada miraha ama wada khudaarta ah ee lagu beeray beeraha dugsiga kuwaasoo la dhaqay laguna jaray meesha si isla markaba loo cuno.

Shuruudaha u qalmida Shaqaalaha iyo Hormarinta Xirfada:

Dhammaan agaasimeyaasha cuntada ee dugsiga, maareeyaasha iyo shaqaalaha ayaa buuxin doona ama ka kormari doonta shuruudaha shaqaale qorista iyo waxbarashada/tababarka joogtada ah ee sanad kasta sida sharcigu amraayo.

Biyaha:

Si loo kordhiyo biyaha jirka, biyaha bilaashka ah, amaan ah, ee aan macaanka lahayn ee la cabo ayay heli doonaan dhammaan ardayda dhammaan maalinta dugsiga ee dugsi kasta. Biyaha la cabo ayaa laga heli doona meesha lagu cuno cuntada dugsiga inta lagu jiro xiliyada cuntada.

Kareenka kahortaga qoraxda:

Yoolka ayaa ah in kor loo qaado caafimaadka maqaarka iyo in la hormariyo adeegsiga maadooyinka qoraxda ka difaaca maqaarka iyo in loo sheego ardayda in arday dhigta dugsi ku yaala Degmadaan uu lahaan karo uuna adeegsan karo kareenka maqaarka ka difaaca qoraxda inta uu joogo dhismaha dugsiga ama munaasabada dugsigu maamulaayo asagoon wadan qoraal ama cadayn kasoo baxday xirfadle caafimaad oo ruqsad leh.

Cuntooyinka iyo Cabitaannada Tayada Badan:

Ugu yaraan, Cuntooyinka Tayada badan ee la siiyo iyo/ama laga iibiyo ardayda, markay joogaan dugsiga maalinta dugsiga, ayaa buuxin doona heerarka nafaqada Dugsiga ee Cuntooyinka Fudud ee USDA. Heerarkan ayaa quseeya dhammaan goobaha iyo dhammaan adeegyada meesha cuntada iyo cabitaanka lagu iibsho ama lagu baxsho.

Waxaa intaas dheer, dhammaan cuntooyinka dugsiga lagu bixiyo maalinta dugsiga ayaa buuxin doona heerarka nafaqafa Dugsiga ee Cuntooyinka Fudud ee USDA.

Lacag Aruurin:

Cuntooyinka iyo cabitaannada buuxsha ama ka kormara heerarka nafaqada Dugsiga ee Cuntooyinka Fudud ee USDA ayaa lagu iibin karaa munaasabadaha lacag aruurinta ee xarunta dugsiga inta lagu jiro maalinta dugsiga.

Degmada ayaa dhiiri gelinaysa hal kulan lacag aruurin oo caafimaad qaba sanad dugsiiyeed kasta.

Hormarinta Nafaqada:

Kor u qaadista cuntada iyo waxbarashada ayaa saamayn wanaagsan ku leh dabecadaha cunto cunista noloshu oo dhan ayadoo la adeegsanaayo farsamooyinka ku salaysan tignooloojiyada iyo fariimaha nafaqada, iyo in la abuuro goobaha cuntada oo dhiiri gelinaaya dookhyada cuntada caafimaadka leh oo dhiiri gelinaaya ka qaybgalka barnaamijyada cuntada dugsiga. Ardayda iyo shaqaalaha ayaa heli doona fariimaha joogtada ah ee nafaqada dhammaan inta lagu jiro dugsiyada, fasallada, xarumaha jir dhiska, iyo maqaayadaha dugsiga.

Degmada ayaa dhiiri gelin doonta dookhyada cuntada iyo cabitaanka caafimaadka leh ee dhammaan ardayda inta la joogo xarunta dugsiga, iyo sidoo kale ku dhiiri gelinaysa inay ka qaybgalaan barnaamijyada cuntada dugsiga. Noocyada cuntada la baqshadeeyo, xog aruurinnada, xayisiinnada iyo/ama tijaabada dhadhanka. Siinta qoysaska xog si loogu booriyo inay cuntooyin caafimaad leh ku karsadaan guriga. Soo dhajinta boorarka nafaqada iyo caafimaadka iyo samaynta casharada cunto karinta ee ardayda.

Degmada ayaa dhiiri gelin doonta cunto nafaqo caafimaad leh iyo farsamooyinka goobta ayadoo dhaqan gelinaysa Dhaqdhaqaaqa Qolka Cuntada Casriga ah ee dhammaan maqaayadaha dugsiyada.

Ayadoo la kaashanaayo AZ Health Zone, Degmada ayaa sahamin doonta fursadaha barnaamijka Beerta Dugsiga kaasoo ay ku jiraan beeraha dugsiga iyo cuntada lagasoo iibsado ganacsatada maxaliga ah.

Waxbarashada Nafaqada:

Waxbarashada nafaqada ayaa diirada saaraysa dabecadaha cunto cunista, ayadoo lagu salaynaayo fikradaha iyo qabaabka wixtarkooda lagu caddeeyay cilmi baarista iyo si waafaqsan heerarka waxbarashada caafimaadka ee gobalka iyo kuwa maxaliga ah ee Degmada. Waxbarashada nafaqada ee dhammaan heerarka manhajka waa in lagu daraa, laakiin kuma koobna, qaybaha soo socda ee muhiimka ah oo loo sameeyay inay ardayda ka caawiyaan waxbarashada:

- A. Aqoonta nafaqada oo ku haboon da'da ayna ku jiraan faa'iidooyinka cuntada caafimaadka leh, nafaqooyinka muhiimka ah, ciladaha naafaqo darada, mabaadii'da maaraynta miisanaka caafimaadka leh, adeegsiga iyo si xun u isticmaalka kaalmaatiga cuntada, diyaarinta cuntada badqabka leh, maamulka iyo kaydinta iyo kala duwanaanta

la xiriirta cuntada iyo wax cunista.

- B. Xirfadaha la xiriira nafaqada ee ku haboon da'da, ayna ku jiraan, laakiin kuma koobna, qorshaynta cunto caafimaad leh, fahanka, iyo adeegsiga cabirada iyo in si adag loo qiimeeyo xogta nafaqada, xogta been abuurka ah iyo xayeynsiyada ganacsiga ee cuntada, iyo
- C. Side loo qiimeeyo dabeecadaha cunto cunista ee qofka, loo dejiyo yoolalka hormarinta iyo gaarista yoolalkaas.

Si loo xoojiyo loona taageero dedaallada waxbarashada nafaqada, shuruudaha ayaa xaqiijin doona in:

- A. Casharada nafaqada ayaa bixinaysa waxbarashada taxanaha ah, ee balaaran ee caafimaadka si waafaqsan sharciyada iyo heerarka tacliinta Manhajka Waaxda Waxbarashada ee Arizona;
 - B. Iskaashi lala sameeyo wakaaladaha iyo ururada bulshada ayaa la dhiiri gelinayaa si loo bixiyo fursado ku haboon mashruucyada ardayda ee la xiriira nafaqada;
 - C. Fariimaha joogtada ah ee nafaqada ayaa lagasoo diraa degmada laga gaarsiiyaa dhammaan dugsiyada, bulshooyinka, guryaha iyo saxaafada, iyo
 - D. Waxbarashada nafaqada ayaa la gaarsiiyaa meelo ka baxsan dugsiyada ayadoo lala shaqaynaayo lagana qaybgelinaayo qoysaska iyo bulshada.
1. Waxaa ku jira shaqooyin raaxo leh, ku haboon kobaca, oo laga qaybgalo, sida bandhigyada cunto karinta ama casharada, xayeynsiyada, tijaabada dhadhanka, suuqyada beereleeyda
 2. Waxay kor u qaadaa maadooyinka miraha, khudaarta, haruurka guud, dufanka yar iyo kuwa aysan ku jirin maadooyinka caanaha iyo qaababka cunto diyaarinta caafimaadka leh;
 3. Waxay isku xirtaa barnaamijyada cuntada ee dugsiyada, shaqooyinka hormarinta nafaqada maqaayada dugsiyada, iyo adeegyada nafaqada la xiriira ee bulshada;
 4. Waxay la shaqaysaa maamuleyaasha si kor loogu qaado manhajka waxbarashada jirka/nafaqada si loogu dabaqo casharada guud

Suuqgaynta Cuntada iyo Cabitaanka Gudaha Dugsiyada:

Cuntooyin iyo cabitaanno kasta oo lagu suuq geeyo ama lagu xayeynsiiyo ardayda oo jooga xarunta dugsiyada muddada maalinta dugsiyada ayaa buuxin doona shuruudaha nafaqada Cuntooyinka Fudud ee Casriga ee USDA ee lagu baxsho Dugsiyada iyo heerarka la xariira ee gobalka.

IV. JIMICSIGA JIRKA

Waxbarashada Jirka:

Yoolka aasaasiga ah ee qaybta jimicsiga jirka ee Degmada waa in la siiyo fursado arday kasta si uu u barto aqoon iyo xirfado gaar u ah shaqooyinka jirka, uu dhiso jirkiisa, uu si joogto ah uga qaybgalo jimicsiga jirka, uuna fahmo faa'iidooyinka mudada dhow iyo kuwa muddada fog ee jimicsiga jirka iyo qaab nololeedka caafimaadka leh.

Barnaamijka jimicsiga jirka oo balaaran ayaa muhiimada siinaaya noocyada kaladuwan ee fursadaha ardaydu ku samayn karaan jimicsiga jirka, ayna ku jirto waxbarashada jirka, nasashada,

barnaamijyada jimicsiga ee dugsiga kadib, waxbarashada caafimaadka leh oo ay ku jiraan barnaamijyada jimicsiga jirka, waxbarashada caafimaadka oo ay ku jiraan jimicsiga jirka oo ah qayb muhiim ah, nasiinooyinka jimicsiga jirka muddada uu socdo casharada caadiga ah.

Mawduucyada Jimicsiga Jirka oo Muhiim ah kuna Jira Waxbarashada Caafimaadka:

Waxbarashada caafimaadka ayaa loo baahan doonaa dhammaan heerarka si waafaqsan barnaamijka hadda ee waxbarashada/shuruudaha heer fasal ee gudigu ogolaaday. Degmada ayaa manhajka waxbarashada caafimaadka faa'iidooyinka jirka, dhimirka, iyo bulshada ee jimicsiga jirka.

- Sida jimicsigu qayb uga qaadan karo miisaanka caafimaad leh
- Sida nolol bilaa jimicsi ah door uga qaadato cudurada dabo dheeraada
- Jirdhiska la xiriira caafimaadka, kaasoo ah, jimicsiga wadnaha, jimicsiga murqaha, awooda murqaha, dabacsanaanta jirka, iyo qaybaha jirka
- Hoos u dhigida shaqooyinka fadhiga badan, sida TV daawashada
- Fursadaha jimicsiga jirka ee deegaanka
- Kahortaga dhaawaca muddada shaqada jimicsiga
- Badqabka la xiriira cimilada, tusaale, iska ilaalinta istarooga kulaylka, iyo kulaylka qoraxda inta aad jimicsiga samaynayso
- Khatarta adeegsiga daawooyinka kor u qaada awooda jirka, sida steroids
- Sida looga hortago cadaadiska ilmaha facaa ah ee diidaaya sameynta jimicsiga.

Nasiinada (Dugsiga Hoose):

Dugsiyada ayaa xaqiijin doona in ardaydu ay sameeyaan jimicsi heer dhexe ah ilaa heer adag ugu yaraan konton boqolkiiba (50%) waqtiga ay ku jiraan casharada waxbarashada jirka.

Fasallada barbaarinta (K) ilaa lixaad (6) ayaa heli doona nasasho ama casharada waxbarashada jirka maalin kasta.

- Arday kasta oo ku jira barnaamijka barbaarinta iyo fasallada koobaad (1) ilaa shanaad (5) waa inuu helaa ugu yaraan sodon (30) daqiiqo oo nasiino ah oo ka kooban shaqada jirka ee maalin kasta oo diyaarsan.
- Shaqada jimicsiga ee nidaamsan ayaa ka dhici karta banaanka ama gudaha fasalka.
- Casharada waxbarashada jirka ayaa ku filnaan kara shardiga jimicsiga.
- Waqtiga jimicsiga ee aan la diyaarin oo dhacaaya isla markaba kadib xiliyada qadada ayaan ku filnayn buuxinta shardiga jimicsiga.
- Degmada ayaan taageerayn shaqada u adeegsiga jimicsiga jirka ama u diidista jimicsiga jirka si ardayga loo ciqaabo (tusaale, bush aabyada lagu ganaaxo dabeecada xun, inaan ardaygu helin waqti jimicsi kadib markuu shaqada dhamayn waayay)

Nasashada Jimicsiga Jirka ee Fasalka:

Degmada ayaa aqoonsanaysa in ardaydu ay feejignaan u lahaadaan ayna diyaar u yihiin waxbarashada haddii la siiyo nasiinooyin xiriir ah si ay jimicsi ama nasiinada jirka u sameeyaan. Sidaas awgeed, ardayda waxaa la siin doonaa fursado goos-goos ah si ay u sameeyaan jimicsi ama ay isku kala bixiyaan maalinta oo dhan dhammaan ama inta badan maalmaha inta lagu jiro asbuuca caadiga ah ee dugsiga.

Kooxda AZ Health Zone ayaa tababar ku bixin kara Nasashooyinka Maskaxda oo lagu baxsho xiisadaha Tababarka iyo Tababaraha.

Marinnada Amaanka ah ee Dugsiga:

Degmada ayaa aqoonsan muhiimada kor u qaadista badqabka, gaadiidka shaqaynaaya ee ardayda iyo qoysaska ku nool aaga dugsiga ee ku xeeran. Ayadoo kaashanaysa AZ Health Zone, Degmada ayaa muhiimada siin doonta aruurinta fikrado laga qaado bulshada iyo iskuxirka saraakiisha la doortay si loogu doodo isbadellada abuuraya jidadka dugsiga oo amaan ah.

Shaqooyinka ka Baxsan Manhajka:

Dugsiyada ayaa bixin kara barnaamijyada dugsiga kadib ee gudaha dugsiga iyo/ama naadiyada jir dhiska oo buuxinaaya baahiyaha iyo xiiseyaasha dhammaan ardayda, ayna ku jiraan kuwa aan ciyaaraha dheelin ama kuwa qaba baahiyaha gaarka ah ee caafimaadka.

V. SHAQOYINKA KALE EE KU SALAYSAN DUGSIGA OO KOR U QAADAAYA FAYA QABKA ARDAYGA

Hormarinta Caafimaadka Bulshada iyo Wada Shaqaynta Qoyska:

Degmada ayaa dhiiri gelinaysa in bulshadu hesho, ayna ardayda iyo bulshadu adeegsadaan, xarumaha jir dhiska ee dugsiga xiliyada ka baxsan maalinta caadiga ah ee dugsiga.

Barnaamijyada dugsiga kadib:

Degmada ayaa ku boorinaysa in barnaamijyada dugsiga kadib bixiyaan jimicsiga jirka oo ku haboon kobaca carruurta ka qaybgalaysa lana yareeyo ama la joojiyo waqtiga lagu baxsho hawlaha fadhiga ah sida daawashada taleefishinka ama muuqaallada.

Faya Qabka Shaqaalaha iyo Hormarinta Caafimaadka:

Gudiga Faya Dhawrka ee Degmada ayaa lahaan doona gudi hoosaadka shaqaalaha faya dhawrka oo diirada saaraaya arimaha la xiriira faya qabka shaqaalaha, aqoonsiyada, faafinaaya ilaha faya qabka samaynaayana shaqooyinka kale ee taageeraaya faya qabka shaqaalaha ayagoo kaashanaaya shaqaalaha ilaha dadka.

TIXRAACYADA:

Xeerka Dugsiga - 24 P.S. Qaybta. 504.1, 1337.1, 1422, 1422.1, 1512.1, 1513

Sharciga Nafaqada Ilmaha iyo Dib U Sharciyaynta WIC oo soo baxay 2004 - 42 U.S.C. Qaybta. 1751 7 C.F.R. Qaybaha 210.2, 210.10 - 210.12, 210.11, 210.30, 210.31

Guddiga Maamulka ee La ansixiyay: June 22, 2022